# Waxaad qabtaa cagaarshowga C

## Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato



## Waa maxay cagaarshowga C?

Cagaarshowga C waa fayras keeni kara caabuq wuxuuna dhaawici karaa beerkaaga.

## Waa maxay micnaha natiijada baaritaanka?

Waxaad u baahan doontaa baaritaan dhiig si aad u ogaato haddii aad qabto caabuqa cagaarshowga C iyo in kale. Baaritaankaan waxaa badanaa loo sameeyaa laba marxaladood:

1. Marka hore, dhiigaaga waxaa laga baaraa nidaamka difaaca cagaarshowga C. Haddii tani ay tahay mid togan, markaas waxaa hore kugu soo dhacay cagaarshowga C mararka qaarkood.
2. Baaritaan labaad ayaa markaa loo baahan yahay si loo eego haddii aad weli cudurka qabto.

- Haddii tani ay tahay mid taban, markaas waxaa hore kugu soo dhacay caabuqa cagaarshowga C waqtiyadii hore laakiin waxaa laga yaabaa in aadan hadda gabi ahaanba qaadin
- Haddii baaritaanka uu yahay mid taban, weli waxaad qabtaa cagaarshowga C.

Ogaanshaha inaad qabtid cagaarshowga C waa mid waxtar leh, maadaama ay jiraan waxyaabo badan oo aad samayn karto si aad si wanaagsan ugu noolaato. Khabiirkaaga ayaa kuu sheegi kara waxaad u baahan tahay inaad samayso.

## Sidee ayuu iigu dhacaa cagaarshowga C?

Cagaarshowga C waxa uu ku faafaa marka la taabto dhiigga qofka cudurka qaba. Waxaa jira siyaabo kala duwan oo laga yaabo inaad ku qaaday cagaarshowga C.

- La wadaagista cirbadaha iyo qalabka la isku duro (‘shaqo’) qof qaba cudurka ayaa ah habka ugu badan ee lagu qaadi karo cagaarshowga C. Inta badan isticmaalayaasha mukhaadaraadka la isku duro ee ku nool Ireland waxay qaadeen cagaarshowga C.
- Waxaad sidoo kale ku qaadi kartaa cagaarshowga C san ka qaadashada  kookaynta
- Waagii hore, dadka qaarkiis waxay cagaarshowga C ka qaadeen ku shubista dhiigga iyo waxyaabaha dhiigga. Laga soo bilaabo 1991, tabarucaadaha dhiigga ee

Ireland waxaa laga baaraa cagaarshowga C, si aadan sidan oo kale mar dambe ugu qaadin cudurka.

- Waxaa jirta khatar yar oo ah in hooyooyinka cudurka qaba ay u gudbin karaan cagaarshowga C ilmahooda ka hor ama xilliga dhalmada. Waxaa 20kiiba ku jirta 1 fursad in tani ay dhacdo. Tani waxay u badan tahay inay dhacdo haddii hooyadu sidoo kale qaado cudurka HIV.

Waxa sidoo kale jirta khatar yar oo ah in lagu qaado cagaarshowga C marka la isu galmoodo. Tani waxay aad ugu badan tahay inay dhacdo haddii qofka qaba cagaarshowga C uu sidoo kale qabo HIV.

Siyaabooyinka kale ee aan caadiga ahayn ee lagu qaado cagaarshowga C waxaa ka mid ah:

- Shaabadaynta iyo mudista jirka iyada oo aan si fiican loo nadiifin
- Dhaawacyada irbada durista ee shaqaalaha daryeelka caafimaadka
- La wadaagista alaabaha gaarka ah sida cadayga iyo sakiimaha qof cudurka qaba
- Sifeynta kelyaha iyo daawaynta qaliinka iyo ilkaha qaarkood waxay keeni karaan caabuq, laakiin tani waa naadir.

Khabiirkaaga ayaa laga yaabaa inuu kuu sheego sida aad cudurka ku qaaday.

Si kastaba ha noqotee, dadka qaar ayaa laga yaabaa in aysan waligood ogaanin sida ay ku qaadeen cudurka.

## Sidee ayuu cagaarshowga C ii saameyn karaa?

Dadka intooda badan ma lahan calaamado marka ugu horeysa ee ay qaadaan cagaarshowga C.

Dad yar ayaa laga yaabaa inay waayaan cunta rabitaankooda, oo uu ku dhaco calool xanuun, xanuun dareemaan, matagaan iyo ku dhaco cagaarshow (maqaarka iyo indhaha jaalaha ah).

Qiyaastii mid ka mid ah afartii qof ee qaba cagaarshowga C ayaa si buuxda uga caafimaado iyada oo aan wax daaweyn ah la siinin.

Si kastaba ha noqotee, dadka intooda badan waxay fayraska qaadi doonaan sanado badan, ama xitaa inta noloshooda ka dhiman. Kani waxa loo yaqaanaa caabuqa cagaarshowga C ee ‘muddada-dheer’ .

Haddii aad qabto caabuq mudda-dheer, waxaa laga yaabaa inaad caafimaad dareento muddo sanado badan ah.

Iyada oo aan laga daaweyn cagaarshowga C, qiyaastii shantii qof ee qaba caabuqa muddada-dheer ayaa yeesha cirrhosis-ka (nabar yeelashada) beerka 20-30 sano kadib. Waxaa markaas kadib laga yaabaa inuu ku dhaco beerka oo shaqo gabo ama kansarka beerka.

## Sidee ayaan u ilaalin karaa caafimaad qab?

Beerkaagu wuxuu lagama maarmaan u yahay si uu caafimaad qabkaaga u ilaaliyo. La'aanteeda ma noolaan kartid. Aad ayay muhiim u tahay inaad jirkaaga ka nadiifiso khamriga, mukhaadaraadka iyo sunta.

- Jooji cabbitaanka khamriga. Khamriga waxaa uu dhaawici karaa beerkaaga.
- Iska tallaal cagaarshowga A iyo cagaarshowga B – haddii aadan hore u qaadan tallaaladan ama aysan kugu dhicin cudurradan.
- Dhakhtarkaagu waa inuu kuu gudbiyaa dhakhtar khibrad leh. Khabiirkaaga ayaa eegi doona xanuunkaaga oo kuna ogeysiin doona wax ku saabsan daawaynta. Xaqiiji inaad aado dhammaan ballamahaaga.
- Kala tasho dhakhtarkaaga ka hor inta aadan qaadan wax daawooyin cusub ah, daawooyinka aan dhakhtarku qorin ama daawooyinka dhirta. Qaar ka mid ah kuwan ayaa u xumaan karo beerkaaga.
- Weydii dhakhtarkaaga haddii aad u baahan tahay inaad qaadato tallaalka hargabka.
- Raadi wax ku saabsan kooxaha maxaliga ah iyo kuwa qaranka ee siiyo taageero dadka qaba cagaarshowga C
- Naftaada u ilaali jir ahaan iyo maskax ahaanba.

## Sidee ayaan u ilaalin karaa kuwa kale?

Haddii aad qabto cagaarshowga C, waxaad caabuqa u gudbin kartaa qof kale. Si taas looga hortago, waxaad u baahan tahay inaad hubiso in dhiigaagu aanu xiriir la yeelan dadka kale.

Waa in aad:

- Waligaa la wadaagin qalabka la iskugu duro mukhaadaraadka sida irbadaha ama saliingadaha.

- Waligaa u oggolaan qof kale inuu isticmaalo sakiintaada, cadaygaaga ama shay kasta oo gaar ah oo laga yaabo inuu dhiigaagu ku dul yaalo.
- Waxaa jirta khatar yar oo aad ku gudbin karto cagaarshowga C xilliga galmada. Kondhomyadu waxay yareeyaan khatartan. Si aad u hesho talo dheeraad ah, la hadal dhakhtarkaaga.
- Haddii aad dumar tahay, ha samayn galmo inta lagu jiro ama toos ka dib caadadaada.
- Ku dabooshaa dhaawacyada furan iyo nabarrada sharootada malaasta ama faashad.
- Ku nadiifisaa dhammaan dhiiga daadanaya shukumaano waraaqo ah. Kadibna jeermiska uga dil meesha xal ka samaysan 10 qaybood oo biyo ah iyo 1 qayb oo warankiilo ah. Ku qalaji meesha shukumaan warqad oo nadiif ah.
- Ku ridaa walxaha dhiigga leh sida tamboonka caadada bac caag ah, ka xirtaa xagga sare oo aad ku ridaa baaldiga qashinka ee dibadda yaalo.
- Waa inaad Ku ridaa sakiimaha iyo cirbadaha la isticmaalay baaldi khaas u ah aflayda. Ka fogee carruurta.
- U sheeg dhakhtarka qoyskaaga iyo dhakhtarkaaga ilkaha inaad qabtid cagaarshowga C.

## Kuma faafin kartid cagaarshowga C markaad:

- Hindhisto ama qufacdo
- Dhunkanayso ama habsiinayso
- Naasnuujinayso
- Cunto ama biyo
- La wadaagayso suxuunta ama galaasyada
- Xiriirka caadiga ah (sida shaqada).

Uma baahnid inaad ka fogaato xannaanada carruurta, dugsiga, shaqada ama hawlaha kale sababo la xiriira inaad qabto cagaarshowga C. Haddii aad u baahan tahay talo ku saabsan cagaarshowga C iyo shaqadaada, khabiirkaaga ayaa kula talin doona.

## Tallaal miyaa loo heli karaa cagaarshowga C?

Maya, hadda ma jiro tallaal la iskiiga difaaco cagaarshowga C.

## Miyey jirtaa daawa loogu talagalay cagaarshowgga C?

Haa. Daawaynta loogu talagalay cagaarshowga C ayaa si xawli ah u horumaray sanadihii ugu dambeeyay. Daawooyin cusub oo ka hortaga fayraska oo loo yaqaano Kahortagga Fayraska ee Tooska u Shaqeeya ayaa la sameeyay. Waxay ku guulaysteen inay fayraska ka nadiifiyaan dhiigga qaar badan oo ka mid ah kuwa lagu daaweeyay. Barnaamijka Daawaynta Cagaarshowga C ee Qaranka ee HSE waxaa loo aasaasay si loo hubiyo in dadka la nool Cagaarshowga C ee ku nool Ireland la siiyo helitaanka ikhtiyaarada daawaynta ee ku habboon.

## Sidee ayaan ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Ka hel macluumaad dheeraad ah iyo buug-yare:

**www.hpsc.ie/HepatitisC**

**www.hse.ie**
(Ka raadi cagaarshowga C sanduuqa dhexe)

**www.gov.uk**
(Ka raadi cagaarshowga C dhanka bidix ee sare)

**www.nhs.uk**
(Ka raadi cagaarshowga C dhanka midig ee sare.)

**www.cdc.gov/hepatitis/hcv/cFAQ.htm**
Adeegyada mukhaadaraadka deegaanka iyo kooxaha taageerada

Dhageystayaasha: Qof dhawaan laga helay caabuqa Cagaarshowga C

Taariikhda: Abriil 2017

Qorayaasha: Kooxda Shaqeynta Cagaarshowga Waaxyaha Caafimaadka Dadweynaha iyo Xarunta Kormeerka Ilaalinta Caafimaadka, Fulinta Adeegga